




Waxa ay Vusi walaashiis tiri


- ✎ Nina Orange
- 👤 Wiehan de Jager
- 💬 Abdi Muse
- 💬 somali
- 📊 nivå 4



Subax amin aroortii hore ah, ayaa Vusi ayaydiis u yeedhay, “Vusi, fadlan u qaad ukuntan waalidkaada, waxay doonayaan inay u sameeyaan keeg weyn arooska walaashaa”.



Jidka marku waalidkiis u sii socday, Vusi wuxuu la kulmay laba wiil oo midho guranaayo. Mid ka mid ah ayaa ukun ka dafay Vusi wuxuuna ku toogtay geed. Ukunti ayaa jabtay.



“Maxaad samaysay?”Vusi ayaa ku ooyay. “Taas waxay ahayd ukuntii keegga, Keeggii walaashay arooskeda. Maxaay walaashey dhihi doontaa haddii arooskeda uu san keeg jirin?”



Wiilashii way ka xumaadeen inay ku ciyaareen Vusi. “Kama caawin karno keegga, laakiin halkan waa usha socodka ee walaashaa,” ayuu yiri mid. Vusi wuxuu sii watay socodkiisi.



Jidka dhexdiisa wuxuu la kulmay laba nin oo dhisahayo guri. “Ma isticmaali karnaa ushaas xooggan?” waxaa weyddiyay mid. Laakin usha ma ahan mid xoogan oo wax lagu dhisi karo, waana jabantahay.



“Maxaad samaysay?” Vusi ayaa ku qayliyay.
“Ushaas waxay hadiyad u a ahayd walaashay.
Kuwii midhaha guran hayay ba isiiyay sababtoo
ah waxay jabiyeen ukuntii keegga. Keeggii
walaashay arooskeda. Hadda ukun maleh, keeg
maleh, hadiyadne majirto. Maxaan walaashey ku
dhihi? ”



Guryo dhisa yaashii way ka xumaadeen inay jebiyeen usha. “Kaama caawin karno keegga, laakiin halkan waa xooga xidhmo ah,” ayuu yiri mid. Sidaas daraaddeed Vusi sii watay socodkiisii.




Jidka dhexdiisa, Vusi wuxuu la kulmay beeraley iyo sac. “Maxay tahay xidhmo macaan, maqaniini karaa?” sicii ayaa waydiiyay. Lakiin xidhmadu way macaaneed marka sicii wuu cunay dhamaan!



“Maxaad samaysay?” Vusi ayaa ku qayliyay. “Taas waxay hadiyad u ahayd walaashay. Waxaa iigu soo dhiibay guryo dhisayaashii sababtoo ah waxay jabiyeen ushii midho guratada. Midho guratada aya isiiyay sababtoo ah waxay jabiyeen ukuntii keegga. Keegga waxaa loo samayn rabay arooska walaashay. Hada ukun maleh, keeg maleh, hadiyadne maleh. Maxaan kudhihi walaashay?”



Sicii wuu ka xumaaday iney noqotay mid hunguri wayn. Beeraalihii wuxuu ku raacay in uu Vusi saca hadiyad uqaato. Sidaa daraaddeed Vusi wuuqaatay.



Laakiin sicii wuxuu dib ugu cararay ninkii beeralayda ahaa. Vusi ne wuu lumay. Wuxuu imaaday xili danbe arooski walashiis. Martida ayaa cuntada cunaysay.



“Maxaan sameeyaa?” Vusi ayaa ku qaylinayay.
“Saca dib u cararay wuxuu aha hadiyadii badalkii xidhmadii fuundayasha isiiyeen. Fuundayaasha aya isiiyay xidhmada sababtoo ah waxay jabiyeen ushii ay midho guratada isiiyeen. Midho guratada ayaa isiiyay usha sababtoo ah waxay jabiyeen ukuntii keegga. Keegga wuxuu ahaa midkii arooska walaashay. Hada ukun maleh, Keeg maleh, hadiyad maleh.”



Vusi walaashiis way fikirtay in muddo ah, ka dibna waxay tiri, “Walaalkay Vusi, runtii ma daneeyo hadiyado, xitaa dan kamalihi keegga! waan wada joognaa halkan dhamanteen, waan faraxsanahay. Hada dhar quruxsan xidho oo aan u dabaaldegnu maalintan!” Taasine waa sida uu Vusi sameeyey.



Barnebøker for Norge

barneboker.no

Waxa ay Vusi walaashiis tiri

Skrevet av: Nina Orange

Illustret av: Wiehan de Jager

Oversatt av: Abdi Muse

Denne fortellingen kommer fra African Storybook (africanstorybook.org) og er videreformidlet av Barnebøker for Norge (barneboker.no), som tilbyr barnebøker på mange språk som snakkes i Norge.

Dette verket er lisensiert under en Creative Commons
[Navngivelse 3.0 Internasjonal Lisens](https://creativecommons.org/licenses/by/3.0/).